



Nofeembar 20, 2023

Qoysaska Qaaliga ah ee Ardayda RCSD ee Fasalada 9-12

Bishii Agoosto, Gudiga Waxbarashada waxoo ansixiyay Nidaam cusub ee Siyaasada Nidaamka Darajada 4710, ku abuuraayo isbedel nidaamka buundooyinka ardayda fasalada 6 ilaa 12. Sanad dugsiyeedkan, Degmada waxay badaloosaa nidaamka dhaqameedka ee buundooyinka xarfaha waxayna u badaloosaa nidaamka buundooyinka tirada miisaan ahaan ah 0-100%.

U dhaqaaqida nidaamka buundooyinka tirada waxa horseed u ah balanqaad lagu horumarinayo hufnaanta, saxnaanta, iyo cadaaladda sida ardayda loo qiimeynaayo.

- **Saxnaanta iyo Hufnaanta:** Darajooyinka tirada waxay bixiyaaan matalaad sax oo dheeraad ah ee waxqabadka ardayga. Waxay bixiyaan sawir cad oo ku saabsan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay ugu baahan yihiin horumarin maado kasto, taasoo u ogolaanayso ardayda inay si fiican u fahmaan hormarkooda.
- **Jawaab celinta iyo Gool Dejinta:** Darajooyinka tirooyinka waxay fududeeyaan jawaab celin gaar ah, taas oo ka caawin karto ardayda inay aqoonsadaan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay ku liitaan. Jawaab celintaan waxay asaas u tahay dejinta goolal tacliimeed oo cad iyo samaynta horumarin.
- **Aqoonsiga Kuliyaada iyo Jaamacada:** Kuliyaado iyo jaamacado badan ayaa aqoonsan nidaamka buundooyinka tirada marka la qiimeenaayo foomamka jaamacadaha. Marka la waafajiyo nidaamka buundooyinka machadyadaan, waxaa hiigsaneynaa inaa si wanaagsan ugu diyaarinno ardaydeena u gudbida waxbarashada sare.
- **Sinaanta iyo Cadaalada:** Nidaamka buundooyinka tirada ayaa yareeso shaqsinimo la xiriirto buundooyinka xarfaha, iyadoo la hubinaayo in si siman loo qiimeeyo waxqabadka ardayga.
- **U Diyaargarowga Kuliyaada iyo Shaqada:** U diyaarinta ardayda mustaqbalka waa qayb aasaasi ah oo ka mid ah hadafkeena. Darajooyinka tirada waxay awood u siinayaan ardayda inay hormar ka sameeyaan tartan aqooneed caalami ah iyo suuqa shaqada.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in Meelaynta Waqti hore, Buundooyinka Jaamacada, iyo Baccalaureate Caalamiga ah ay noqon doonaan fasalada kaliya ee miisaan dheeraad ah la saaro darajada tirada ee laga gaarey, maadaama kuwaan ay u baahan yihiin shaqo koorso adag. Sidoo kale, diiwaanka ardayga waxa loo bedeli doonaa darajooyin tirooyin ah. Hadii mar hore darajada xarfaha loo bedelin darajada tirada, ardayga waxoo heli doonaa tirada ugu koreeso ee ku dhex jirto darajadaas tirooyinka xarfaha. Tusaale ahaan, A waxa matalaayo ardayda dhibcaha 90-94. Hadii darajada ahayd A eena ahayn darajo tiro ah, ardayga waxoo heesan doonaa 94 ee diiwaankooda.

Waxaa rabnaa inaa kula shaqeyno saa u hubinino in canugaaga helo waxbarashada ugu fiican ee suurtoogalka ah. Fadlan ha ka laalaabanin inaa la xiriirtid la taliyaha canugaaga ama maamulaha wixii su'aalo ah.

Waa ku mahadsan tahay taageeridaada joogtada ah iyo aaminaantaada waxbarashada canugaaga.

Run ahaantii,

Demario Strickland  
Kuxigeenka Kormeeraha Waxbarashada iyo Barashada